

METRO E Line ee cusub

Gaadiidka degdega ah wuxuu imanayaa Waddada 6

METRO E Line waa leen Bus Rapid Transit (BRT) kaas oo bixin doona gaadiid degdeg ah oo la isku halayn karo ee Wadada 6. Adeegga BRT waa xirmada horumarinta gaadiidka oo ku kordhinaya safar degdeg ah iyo waayo-aragnimo horumarsan oo ku saabsan waddooyinka basaska ee ugu mashquulka badan Metro Transit.

In ka badan 8,000 oo raacis ah ayaa lagu sameeyay Jidka 6 maalin kasta oo shaqo ah sanadkii 2019. Raacitaanka waddada 6 ayaa weli sii ahaaneyso mid xoogan, xitaa inta lagu jiro cudurka safmarka ah.

METRO E Line wuxuu ku safri doonaa 4th Street iyo University Avenue, isagoo sii dhex mari doona Bartamaha magaalada Minneapolis iyo Uptown ee Hennepin Avenue ilaa Southdale Transit Center ee Edina isagoona sii maraya 44th Street iyo France Avenue.

Naqshadaynta Saldhiga Horudhac ah ee E Line

METRO E Line stations Metro Transit waxay raadinaysaa ra'yi-celintaada ku aadan naqshadaha hordhaca ah ee saldhigyada METRO E Line Ka fiiri qorshayaasha faallana ka bixi hadda metrotransit.org/e-line-project ama iimayl noogu soo dir ELine@metrotransit.org. ELine@metrotransit.org.

Ka eeg khariidada faahfaahsan barta metrotransit.org/e-line-project



Iskaan mari si aad u booqato websaydka mashruuca, fiiri khariidadda isdhexgalka, oo bixi jawaab celin.

Jadwalka Mashruuca Hordhaca (waa la bedeli karaa)

• 2018-2019	• 2020-2022	• 2022-2023	• 2024-2025	• 2025
DARASADDA MARINKA	QORSHAYNTA	INJINEERNIMO	DHISMO	U FURAN ADEEG

CIDA LAGALA XIRIIRAYO MASHRUUCA:
Erik Thompson
ELine@metrotransit.org

Metro Transit
metrotransit.org/e-line-project

Bus Rapid Transit: Gaadiid dhaqso badan, la isku halaynkaro, oo raaxo badan

Metro Transit waxa ay horumarinaysaa shabakada leenanka bus rapid transit (gaadiidka mashquulka badan ee baska) ee gobolka Twin Cities. Habkan wax ku oolka ah ee loo dedejiyo adeegga ayaa si weyn u wanaajinaya khibrada macmiilka waxayna caddaysay inay soo jiidato dad badan si ay si joogto ah u isticmaalaan gaadiidka.



Saldhigyada xaafadaha oo leh adeegyo

Saldhigyada waxaa lagu qalabeeyay sifooyin loogu talagalay waayo-aragnimo badbaado iyo raaxo leh, oo la mid ah tareenka korontada ku shaqeeya.

- NexTrip waqti saxda ah ee imaanshaha iyo macluumaadka tagista
- Kulaylka la rabo, nalka amniga, iyo isgaarsiinta xaaladaha degdegga ah
- Near-level boarding – ugu lug ee baska adigoo wax jaraanjaro ah u fuulin
- Dhigashada Baaskiilka iyo haraaga qashinka ah

Joogsiyo xadidan, adeeg joogto ah

BRT waxay shaqayn doontaa 10-15kii daqiiqoba mar inta badan maalinta iyada oo saldhigyo ku leh 1/3 ilaa 1/2 mayl kasta.

Sida qorshayntu u socoto leen kasta, Metro Transit waxay qiimeyn doontaa suuqa iyo baahida loo qabo adeegga baska deegaanka ee dheeraadka ah ee meelaha ku teedsan waddada.

Bixinta qiimaha safarka kahor inta aan la gaarin joogsiyada degdegga ah

Si aad dhakhso ugu gasho albaabada oo dhan, basaska BRT ma qabaan sanduuqyada lacagta lagu rido. Macaamiishu waxay iibsaa doonaan tigidh ama waxay ku dhufan doonaan Go-To Card ee laga helo saldhigga, sida tareenka korontada ku shaqeeya. Kormeerka lacagta waxa samayn doona booliiska Metro Transit.

Kaabayaal cusub si loo kordhiyo xawaaraha

Marka lagu daro saldhigyada la hagaajiyay iyo kala dheeraynta joogsiga ballaaran, Metro Transit iyo la hawlgalayaasheeda ayaa sahaminaya fursadaha si ay xadadkan BRT uga dhigaan mid aad u dheereeya. Doorashooyinka waxaa ka mid ah:

- Mudnaanta ishaarada si aad u sii socoto basaska waxay "weydiisan karaan" nalalka cagaaran ee hore ama fidsan ee isgoysyada qaarkood
- Jidadka baska-kaliya ee ku teedsan qaybo ka mid ah leenka si basaska looga ilaaliyo taraafikada